



# 5 shay oo loo baahan yahay in laga ogaado macdanta "lead" ee ku jirta biyaha la cabbo



Macdanta "lead" waxay badanaa gashaa biyaha la cabbo ee laga helo siistemka biyaha dhismaha. Qiyaasta macdanta "lead" ee ku jirta biyaha la cabbo waxay ku xeran tahay sida macdanta ku jirta biyaha u saameyso alaabta loo isticmaalo in lagu dhiso siistemka biyaha.



Caruurta ku dhawaata macdanta "lead" marka ay jiraan lex sanno ama ka yar waa kuwa ku jira halista ugu badan xagga dhibatooyinka caafimaadka. Waxay kaloo waxyeelo gaarsiin kartaa dumarka xaamilada taasoo maxaa yeelay waxay waxyeelo gaarsiin kartaa ilmaha ku jira caloosha.



Qofka ay soo gaarto sunta macdanta "lead" ma u muuqdo ama ma u dhaqmo sida in uu xanuunsan yahay.



Ma ka walwalsan tahay in cunugaada uu ku dhawaaday macdanta "lead"? La hadal bixiyehaada daryeelka caafimaadka haddii loo baahan yahay in cunugaada laga baaro macdanta "lead". Baaritaanka dhiigga waa sida keliya ee lagu hubin karo.



Biyaha ma aha ilo caadi ah oo laga helo macdanta "lead". Macdanta "lead" waa midda badanaa lala kulmo ee halista ah. Carrada Dagmada King (King County) iyo qaar ka mid ah alaabta kale ee reerka, sida alaabta qaar ay ilmaha ku cayaaraan iyo nacnaca dibadda laga keeno, waa ilo kale oo laga helo macdanta "lead".